



Yersiniosis (Infekshanka *Yersinia* ee mindhicirrada)

WAA MAXAY?

- ✓ *Yersiniosis*-ka waa infekshan mindhicirrada (caloosha) gala oo u keenay baktiiryada (jeermiska) loogu yeedho *Yersinia enterocolitica*.
- ✓ Baktiiryada waxaa laga helaa saxarada (dhaqdhaqaaqa caloosha) ee dadka iyo xayawaanka, qaasatan qaansiirka qaba.
- ✓ *Yersinia enterocolitica* badanaa waxaa ay saameysaa carruurta.

CALAAMAADKA

- ✓ Calaamaadka caadiyan waxaa ay billawdaan 3 illaa 7 cishood kaddib marka laga ag dhawaado waxaanna ka mid ah:
 - Shuban
 - Calool xanuun
 - Xummad
 - Calaamaad kale sida lalabo ama matag.
- ✓ Mararka qaarkood calaamaad ma laha, balse saxarada ayeey baktiiryada soo raaci kartaa. Dadka aan qaadan daawada antibiyootikada waxaa ay baktiiryada saxaradoodaa ku jiri kartaa 2 illaa 3 bilood, xittaa haddii aaney calaamado qabin.

SIDEE BAY YERSINIA U FAAFTAA?

- ✓ Dadka waxaa ay infekshanka ka qaadi karaan cunnada halaysan, qaasatan qaansiirka cayriinka ah ama aan si fiican loo karin, caanaha aan la karin, iyo iyagoo ka ag dhawaada xayawaanka qaba ama biyo halaysan.
- ✓ Dadka qaba ee aan gacmahooda si fiican u dhaqin kaddib marka ay isticmaalaan suuliga waxaa ay infekshanka u gudbin karaan dadka kale.

GARASHADA CUDURKA IYO DAWAYNTA

- ✓ Baktiiryada waxaa lagu garan karaa baaritaanka saxarada.
- ✓ Xaaladaha daran, takhtar ayaa u qori kara antibiyootic lagu daweeyo infekshanka *Yersinia*.

KA HORTAGGA

- ✓ Ha cunin qaansiir cayriin ah ama aan si fiican loo karin.
- ✓ Waxaad cabtaa oo keliya caanaha la kariyey iyo alaabta laga sameeyo.
- ✓ Gacmaha ku dhaq saabuun iyo biyo inta aadan cunnada cunin amaba diyaarin, marka aad xoolaha ka ag dhawaato, iyo marka aad hilib taabato.
- ✓ Marka aad calooleyda taabato, gacmaha iyo cijiyaha isaga dhaq saabuun iyo biyo inta aadan taaban dhallaanka ama alaabta ay ku ciyaaraan, dhalooyinka, ama waxyaabaha afka loo geliyo.
- ✓ Haddii aad diyaariso calooley, ha taaban carruurta amaba ha diyaarin cunnadooda inta aad calooleyda ku hawlan tahay.
- ✓ Icticmaal meel ka duwan meelaha aad ku goyso cunnada kale iyo hilibka.
- ✓ Si taxaddir leh u nadiifi meelaha aad ku goysay, miiska dushiisa iyo maacuunta adigoo isticmaalaya saabuun iyo biyo kulul marka aad diyaariso kaddib.
- ✓ Si nadaafad leh u tuur saxarada xayawaanka.

XUSUUSNOW: Dadka qaba infekshanka *Yersinia* ma aha in ay ka fogaada in ay cunno ka shaqeeyaan, fidiyaan daryeel xanaano ama daryeel bukaan oo toos ah illaa calaamaadka ay ka dhammaadaan.

U soo sheeg kiisaska oo idil adigoo waca Caafimaadka Dadweynaha (Public Health) (206) 296 - 4774.